

Waa Maxay Aflatoxin?

Aflatoxin waa dhibaateeye saameeya noolaha iyo masagada. Aflatoxin wuxuu keenaa cudurka kala duwan oo ka mid yahy Beer-Fuur, Gobolka Bay aad ugu badan yahay. Dad badan oo ku nool qaaradda Africa ayaa u dhinta cudurro ku dhasho sunta ka soo baxa Aflatoxin.

Aflatoxin mesagada ku dhasha muxuu dhib leeyahay?

- Wuxuu hoos u dhac ku ridaa tayada xabuubta miraha
- Wuxuu hoos u dhac ku keenaa qiimaha suuqa masagada iyo isticmaalkeeda
- xabuubta ayuu ku dhacaa mana abuuranto waxayna noqotaa mid jirran mirta oo cudur keena

Qodobada suurta galin kara inuu masagada sumeeyo

I. Goosashada ka hor

Cudurka waxaa laga helaa ciidda gudaheeda iyo hawadaba. Waxay waxyeleysa masagada xilliyada goosashada ka hor iyo keydshada ka dibba, waxayna suurta galisaa in waxyeellada Aflatoxin ka kororto oo taranto. Waxyaabaha keena cudurka waxaa ka mid ah:

- Isticmaalka qalab fududeeya falashada
- Fasalka oo uu qoyaanka ka dhammaado in ka badan 20 cisho
- Is badalka heerkulka u dhaxeeya 20°C-31°C
- Mirta oo dhaawacanta
- Dhimasho ku timaadda miraha oo uu sababo cudurka xilliga qaangaarka miraha

II. Goosashada ka dib

- Goosashada xilliga oo la dadajiyoo marka uu dalaggu qaan gaaro.
- Xilliga goynta oo mirta la dhaawaco
- Goosashada oo La tubo xilli huur jiro
- Mirtii oo uu dhaawaco Cayayaan inta ay bakaarta ku jirto
- Mirta oo qoyaan ku jiro oo la keydiyo
- Miraha fasalka oo ciidda lagu daadiyo si loo qalajiyo si qaldan

Aflatoxin ka dalagyada uu sida fudud u gao waa:

- Xabuubleyda: Galley, Masagada, Bariiska, Qamadiga iyo Doqonka
- Geed saliideed: Lows ka Suufka, Gabaldayaha & Soybean ka.



- Geed Kuleylka:- Basbaaska, basbaas madoobaha,
- Nuts:- Almond, Pistachio, walnut, & Qunbaha.
- Caanaha iyo waxyaabaha caanaha laga sameeyo.

Sidee looga hortegi karaa Aflatoxin?

I. Goosashada Dalagga ka hor

- Isticmaal nooca Masagada ee u adkeysta Aflatoxin ka
- Isticmaal bacrinta Digada Xoolaha & Caleenta geedaha @ 5-10 tan/ha.
- Qiyaasta ugu dhow ee tirade geedaha ee Beerta.
- Xilli hore abuur fasalka si looga hortago dhibka cayayaanka.
- Ka nadiifi beerta geedaha ku haray goosashada ka dib.
- Gooso Dalagga xilliga ugu haboon uu qallalo.

II Goosashada Dalagga ka dib

- Xilliga goosashada ka ilaali dhaawac miraha.
- Qallaji gebi ahaanba miraha la soo gooyey ka dib goynta dalagga 15 illaa 20 maalmood.
- Qalaji dalagga illaa qoyaanka miraha uu ka hoos maro 12% boqolkiiba.
- Hubi fayaqabka god bakaarta si aad uga badbaaddo haraagii hore ee godka iska nadiifi.
- Xilliga finjilka isticmaal qalabka ugu habboon
- Ka qaad miraha dhaawacan & kuwa cayayaanku dhaawacay
- Kala sooc sabuulka jirran iyo kan caafimaadka qaba.
- Ka hortag dhibaataada cayayaanku geysan karo godka dhexdiisa.
- Ka reeb dhammaan miraha aan qaangaarin (bisalaan), kuwa dhaawacan & kuwa jirran ka hor inta aan la keydin.